



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 08/2012

Ergeyga Gaarka ah oo aad uga xumaaday weerarka ismiidaaminta ah ee lala beegsaday Tiyaatarka Qaranka

Muqdisho, 04 April 2012 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa muujiyay sida uu uga naxay uguna xanaaqay weerarkii ismiidaaminta ahaa ee ka dhacay Golaha Tiyaatarka Qaranka ee magaalada Muqdisho halkaasoo ay maanta ka socotay xaflad dabbaaldeeg ah. Waxaa la sheegay in weerarkaas lagu dilay ugu yaraan lix qof, tiro intaa ka badana ku dhaawacmeen.

“Dib u furidda Golaha Tiyaatarka Qaranka waxay astaan u tahay isbedelka dhabta ah ee ka socda Soomaaliya: caasimadda ayaa dib loo dhisaya, hidaha iyo dhaqanka ayaa dib loo soo nooleynaya, waxaana dib loo soo celinayaa rajada”, ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah. Isagoo ka soo hadlaya magaalada Istanbul, Turkey, halkaasoo uu kula kulmayay madaxda Turkey si taageero loogu helo hawlaha muhimka ah ee ka dhici doona Soomaaliya, ayaa Ergeyga Gaarka ah wuxuu muujiyay sida uu uga xunyahay dadka ku dhintay ismiidaaminta iyo argagaxa loo geystay dadka Soomaaliyeed.

“Waxaan taci tiiraanyo leh u dirayaa ehellada dadkii maanta la dilay, oo argagaxa loo geystay”, ayuu yiri Dr. Mahiga. Wuxuu mar labaad ugu baaqay Kooxda Al-Shabaab ee sheegatay inay mas’uul ka tahay weerarka inay joojiso colaaddan dhibaataada weyn u geysatay dadweynaha Soomaaliyeed ee rayidka ah, iyadoo aan haba yaraatee wax xurma ah aan siinaynin nolosha dadka baniaadanka.

Wuxuu madaxda iyo dadka Soomaaliyeed ugu baaqay inay mar kale xaqiijiyaan inay ku taagnaadaan waddada nabadda iyo dibuheshiisiinta. “Waa inaan ogolaanin in falkan naxdinta leh uu naga weeciyo horumarka ka socda Soomaaliya”, ayuu yiri. Wuxuuna sheegay in guulo la taaban karo ee dhanka siyaasadda Soomaaliya ay soo dhowyihiin, sida ansaxinta dastuurka oo dhici doonta bisha May, xukuumad cusubna la dhisi doono bisha August. “Dadka Soomaaliyeed aayahooda madaxfurasho uma haysan karaan koox yar oo qaswadeyaal ah oo si fuleynimo leh u adeegsada falal argagaxisinimo oo ay la beegsanayaan muwaadiniinta walaalahooda ah.”

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Dawn Elizabeth Blalock, Xafiiska Isgaarsiinta Guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 6805 ama +254739976814

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org